

Golaha Dawladdiyo Waalidkaa Gabay Xilkoodii

- 1) Gadgaddoonka dunidaani waa har iyo geedkiise
- 2) Waa galangalkaas kaaga iman gelinba meel uune
- 3) Dhaqamada galbeediga ah ee yaalla gurigeenna
- 4) Iyo keenni oo laga gudboo geedka lagu laalay
- 5) Waa waxay ka geyllami jireen guurtidii hore'e
- 6) Nin sidayda geda wyn jirana gaabsi uma yaalle
- 7) Gobaysane da'roontii kacdaan soo garwaaqsadaye
- 8) Dhaqankaan gedmadey waa inaan gabay ku muujaaye

- 9) Guuyada waxaa ugu mudnaa dhogor yarrow geele
- 10) Wixii ganacda qaalliga noqduu waayo goyn jireye
- 11) Gololada Habalaha ee si kale loogu geli waayey
- 12) Markii geela laga soo tuboo golaha uu keeno
- 13) Gargeyrtaa waxay siin jireen gaabiyow odaye

- 14) Gembi iyo guhaad iyo dagaal dhiiggu gabaxleeyey
- 15) Raggoo gawrac lagu jidey oo haadku giganaayo
- 16) Fardahana gawaan raacis iyo gaadmo lagu qaatay
- 17) Wax kastoo dhib gaaraba ciddii laga gol roonaado
- 18) Markii geela loo keeno bay nabad ku guuxaane
- 19) Gadaalna looma sii eegjirin goobihii shalaye
- 20) In kastuu magtii weli galiyo rebistii godobta
- 21) Haddaad baatir geel iyo dameer suuqa wada geysid
- 22) Wax hortii lagaa gadanayaa taa gafuurka cade
- 23) Iyadaana ganacdiyo ku roon goynta lacageede

- 24) Gaawihiyo doobiga la culay gocayga xoolaysan
- 25) Sibraar laga gingimo bay lahayd godolka maandeeqe
- 26) Galeheeda lama keeni jirin shay kaloo godane
- 27) Galaasyiyo haddana caagadaa loola soo galaye
- 28) Dhadhankoodi waa kaas gedmaday galaxy caanoode

- 29) Afartaas gudbaye waxan haddana garabdhigoo sheegay
- 30) Geel jiruhu doob wuxu ahaa gaajadaw adage
- 31) Murqo goostay oo gaamuroo gaannan xoog badane
- 32) Magawsuu ku qadi jirey ka badan maalin gelinkeeda
- 33) Gadaalkaanse jaadbuu barto geeli shubi waaye

34) Raacdana ma geli karo haddaan daadnka loo geline
35) Geeli markan wuxu halis u yahay guudlihii bahale

36) Geedka qabada haan laga toloo guriga kuu taalla
37) Markaad kalaxa gadawgeeda suran kaga harraad goysid
38) Ama aad majaja gorod xabkiis furatid geeskaaga
39) Qabow gaws dambeedkaaga iyo laabta wada gaarye
40) Haddii aanay goombaar ahayn guriga tii joogtey
41) Galjirmiyo sarmaan ama agllood lagu gabsiiyaaba
42) Gudohooda caraf weelashaas laguma gaarayne

43) HALKAAS~QAARBAA KA MAQAN

44) Gabay horoon ka tiriyaa jiriyo maanso gaar u ahe
45) Kuwa geesta xiirtiyo kuwaas foodda hore geystey
46) Goonnada khafiifka ah haddana gaaban xiradkeeda
47) Jacayl laysu gubo iyo ilmaha gabadhu xoorayso
48) Iyo gabayga edebtiis axwaal aan ka gaabsanayo
49) Waa guuldarrada filinku dhalo qoon yar baa garane
50) Waa gaalo iyo dhaqamadeed keenni gaasiraye
51) Gabaygii Cismaan yuusuf baan soo garwaaqsadaye
52) Geyi kale wax laga sheegi karey bayna soo galaye
53) Markaan gees ka fiirshana waxaa hawshan gacan siiyey
54) Golaha dawladdiyo waalidkaa gabay xilkoodiye
55) Gabdhagheenu dhaqabkii hufnaa saynu garanayno
56) Geyaankoodu meeluu fadhiyo jeer ma soo geline
57) Haddana gaabsashadi iyo ka tage gole ka sheexiye
58) Ragna gacanti laga saar tan iyo gulufki wartone
59) Ragaan idin garaad dhaamion baad gun u ahaydeene
60) Gilgishaa la yiri oo kakaca wayska gama' deene
61) Iyaguna guddoonkaas la dhace gabal yar mooyaane
62) Gurbood korinti iyo hawshi guro gooey badankoodo
63) Markii hooyadii gurigi iyo ay ilmihi goyseye
64) Ubad garasho iyo edeb yar baa kacay gadaalkaane
65) Guddonkiyo waxgoyntiyo gartiyo xaajo geliddeeda
66) Waa loo gudboon yahay haddeer labada gesode
67) Raggii bay is gees yacaan garabna dhaafeene
68) Markaan gees ka eegana waxaa hawshan garab siiyey
69) Golaha dawladiyo waalidkaa gabay xilkoodiye
70) Haddii aan sharciga loo gefayn gabal siduu yeelay
71) Tacliintii inay geli karaan waan garwaaqsadaye
72) Hantidooda gaar ganacsigii waan garwaaqsadaye
73) Balse dhaqanki oo loo gefaa keenay gabaygaane
74) Afartaas gudbaye waxan haddana garab dhigoo raacshey
75) Guddoon waxay lahaayeen markay gaban ahaayeene
76) Niman gabar magteed geel baxshaa joogin gurigiisa
77) Oo aan gammaan iyo fardiyo giiryar badan haysan

- 78) Gargeyr iyo Ikhyaar nimaan shiikhyo garab joogin
- 79) Haddii laysu geeyana tirsiga boqol nin aan gaarin
- 80) Xilkaas waw gafaye maba geyoo waa ka garanuuge
- 81) Garaadnimo markuu sheegtay oo taajka loo geliyey
- 82) Isimmadan is garab yaacayaa soo gadaal baxaye
- 83) Dhaqan iyo markaad geda horoo guuna dib u eegtid
- 84) Garaad iyo Suldaan iyo Islaan Boqor Garwaaxedsan
- 85) Guddoon iyo ducaa lagu ogaa gooshigii hore'e
- 86) Garab dhaafe sooyaalki oo gees mar badankoode
- 87) Sidii geel habeed luqunta iyo jilibka gaarsiiyey
- 88) Siyaasada intii ay galeen lays afgaranwaaye